Warbixin ku socota qaxootiga Soomaaliya ka yimid ee codsaday in loo cusbooneysiiyo oggolaashada joogitaanka

Haddii aad tahay qof qaxooti ah oo Soomaaliya ka yimid oo aad codsatay in laguu cusbooneysiiyo oggolaashadii joogitaanka, waxay UDI marka hore qiimayn ku samayn doontaa in aad weli sii haysanayso qaxootinnimadii iyo in kale.

Waxaa la daabacay: 04.04.2017 – Waxaa wax laga beddelay: 15.04.2019

UDI waxay hadda qiimayn ku samaynaysaa isbeddelka ku yimid xaaladda Muqdisho in uu keenayo in soomaalidii oggolaashada qaxootinnimo helay wixii ka horreeyay 01-dii oktoobar 2014-kii ay weli magangelyo u baahan yihiin, iyo in ay si nabad ah Muqdisho ugu laaban karaan. Wasaaradda caddaaladda- iyo heeganka ayaa sidaas go'aamisay.

Haddii aad doonayso in aad wax ka ogaato dadka la siin karo magangelyada iyo kuwa lumin kara oggolaashada joogitaanka, waxaad akhrisan kartaa waraaqaha hoose ee warbixinta xambaarsan:

- Norsk asylpolitikk og arbeidet med oppholdstillatelser (somali) (pdf, 410 kB)
- Norsk asylpolitikk og arbeidet med oppholdstillatelser (norsk) (pdf, 255 kB)
- Norsk asylpolitikk og arbeidet med oppholdstillatelser (engelsk) (pdf, 334 kB).

Waa kuwee dadka oggolaashadooda qaxootinnimo dib loo qiimaynayo?

Oggolaashadaada qaxootinnimo dib ayaa loo qiimaynayaa haddii aad Norway timid adiga oo magangelyadoone ah ka dibna oggolaasho qaxootinnimo lagu siiyay wixii ka horreeyay 01-dii oktoobar 2014-kii, islamarkaana aadan weli helin oggolaasho joogitaan oo rasmi ah [permanent oppholdstillatelse].

Haddii ay arrintani ku khuseyso waxaad sida ay u badan tahay haysataa baasabboor qaxooti [reisebevis] oo cagaar ah.

Waxaa sidoo kale oggolaashadaada qaxootinnimo dib loo qiimayn doonaa haddii aad oggolaashada qaxootinnimada ku heshay xaaskaaga/ninkaaga, gashaankaaga (qofka aad wada nooshihiin) ama waalidkaa oo oggolaasho qaxootinnimo Norway ka helay daraaddood, iyaga oo oggolaashadaas helay wixii ka horreeyay 01-dii oktoobar 2014-kii. Haddii uu qofkani helay oggolaasho joogitaan oo rasmi ah, oggolaasho degitaan [bosettingstillatelse], ama dhalashada noorwiijiga, markaas oggolaashadaada qaxootinnimo dib uma qiimayn doonno.

Maxaa ku dhici doona oggolaashadaada joogitaanka?

Qaybta magangelyada ee UDI ayaa qiimayn ku samayn doonta in isbeddellada Muqdisho ka dhacay ay keenayaan in aadan magangelyo u baahnayn.

Labada arrimood ee soo socda midkood ayaan go'aan ku gaari doonnaa

- in aad sii haysato oggolaashadaadii qaxootinnimo oo laguu cusboonaysiiyo oggolaashadii joogitaanka ee Norway, ama
- in lagaa qaado oggolaashadii qaxootinnimo iyo oggolaashadii joogitaanka, oo aad dalkaagi aaaddo.

Inta aad jawaabta sugeyso waa in aad codsataa oggolaasho joogitaan oo ku meelgaar ah

Dad badan oo Soomaaliya ka yimid ayaa annaga oo aan weli go'aan ka gaarin in ay sii haysanayaan oggolaashadii qaxootinnimo oo ay Norway sii joogayaan, ayaa waxay heleen oggolaasho joogitaan oo ku meelgaar ah, kaar joogitaan [oppholdskort] oo cusub iyo baasabboor qaxooti oo cusub.

Haddii aad heshay oggolaasho joogitaan oo ku meelgaar ah oo noocaan ah, oo ay kaa dhacday ama ay mar dhow kaa dhacayso, waa in aad codsataa in laguu cusbooneysiiyo, si aad u lahaato oggolaasho joogitaan oo shaqaynaysa. Waxaa sidoo kale lagaaga baahan yahay in aad codsato in laguu cusboonaysiiyo baasabboorka qaxootiga. Eeg warbixintayada ku saabsan muddada sugitaanka cusboonaysiinta oggolaashada joogitaanka magangelayada.

Maxaa ku dhacaya codsiyada xubnaha qoyskeyga?

Haddii ay xaaskaaga/ninkaaga, gashaankaaga ama carruurtaadu codsadeen in oggolaashadii joogitaanka loo cusboonaysiiyo, sida caadiga ah waa loo cusboonaysiinayaa oggolaashada joogitaanka haddii adiga taada laguu cusboonaysiiyo. Haddii ay codsadeen baasabboorka ajnebiga ama baasabboorka qaxootiga, waan ka baaraandegaynaa codsiga.

Haddii aan adiga laguu cusboonaysiinnin oggolaashada joogitaanka, xubnaha qoyskaagana loo cusboonaysiin maayo.

Haddii ay xaaskaaga/ninkaaga, gashaankaaga ama carruurtaadu ay hadda qoys isu keenid soo codsadeen oo ay dibedda joogaan, markaa codsigooda laga soo jawaabi maayo ka hor inta aan adiga lagaaga soo jawaabin in aad sii haysanayso oggolaashada qaxootinnimo iyo in kale.

Maxaa ku dhacaya carruurta Norway ku dhalatay?

Haddii aad leedahay carruur Norway ku dhalatay oo aan weli helin oggolaasho joogitaan, waa in aad oggolaasho joogitaan ilmaha u codsataa.

Muddo intee le'eg ayaad sugaysaa?

Haddii aadan weli jawaab helin, waa in aad UDI jawaab ka sugtaa.

Waan ka xunnahay laakiin weli ma ogin muddada ay qaadan doonto in aan kiiskaaga ka baaraandegno. Sidaas darteedna waa in aadan dalban tigidho aad dibedda ugu safrayso ka

hor inta aan codsigaaga laga soo jawaabin ama aadan helin oggolaasho joogitaan oo ku meelgaar ah, kaar joogitaan oo cusub iyo baasabboor qaxooti. Haddii aan codsigaagi weli laga soo jawaabin ama aadan helin oggolaasho joogitaan oo ku meelgaar ah, markaas laguma siin karo kaar joogitaan oo cusub iyo baasabboor qaxooti midna.

Annaga ayaa kula soo xiriirayna haddii aan dokumiinti kale ama warbixinno kaaga baahanno. Waan kuu soo sheegaynaa marka aan codsigaaga ka baaraandegno.

Haddii aad u baahan tahay caddayn ah in aad oggolaasho joogitaan Norway ku leedahay inta aad jawaabta sugeyso, waxaad taas ka dalban kartaa UDI.

Haddii aad codsatay in oggaalashada joogitaanka laguu cusbooneysiiyo ugu yaraan hal bil ka hor intaysan dhicin oggolaashadaadii joogitaanka ee hore, markaa inta aad sugayso in aan codsigaaga ka baaraandegno waxaad lahaanaysaa xaq la mid ah kaagii hore marka la eego xaqa aad u leedahay shaqada, waxbarashada iyo wixii la mid ah. Xuquuqdaan ayaad lahaanaysaa ilaa iyo inta codsigaaga laga soo jawaabayo, xataa haddii ay oggolaashadaadii joogitaanku dhacday intii aad jawaabta sugaysay.

Haddii aad hesho warqad ay ku qoran tahay in ay UDI qiimayn ku samaynayso in lagaa qaado oggolaashadii qaxootinnimada, waxaad xaq u leedahay qareen. Waa in aad adigu qareen qabsataa.

Waa kuwee dadka aan oggolaashadooda qaxootinnimo dib loo qiimayn doonin?

- Dadka helay oggolaashadii joogitaanka ee koobaad ka dib 1-dii oktoobar 2014-kii.
- Qofka hadda haysta oggolaasho joogitaan oo rasmi ah, oggolaasho degitaan, ama dhalashada noorwiijiga.
- Qofka haysta oggolaasho qaxootinnimo oo lagu siiyay xaaskiisa/ninkeeda, gashaankiisa ama waalidkiis oo haystay oggolaasho qaxootinnimo, haddii uu qofkaasi helay oggolaasho joogitaan oo rasmi ah, oggolaasho degitaan ama dhalashada noorwiijiga.
- Haddii aad Norway timid adiga oo qaxooti la soo qaatay ah.
- Qofka Norway ku haysta oggolaasho joogitaan oo ku salaysan arrimo bani aadminnimo (xaalado bani aadminnimo oo adag ama xiriir adag la leh Norway). Haddii ay tani ku khusayso waxaad haysataa baasabboor ajnebi oo buluug ah.
- Qofka Norway ku yimid qoys isu keenid kaas oo loo keenay xubin qoys oo haysata oggolaasho joogitaan oo rasmi ah, oggolaasho degitaan ama dhalashada norwiijiga, ama oggolaashada qaxootinnimada helay ka dib 1-dii oktoobar 2014-kii.

Haddii aad ku sugan tahay xaalad noocan ah sidii caadiga ahayd ayaa looga baaraandegi doonaa codsigaaga cusboonaysiinta oggolaashada joogitaanka. Warbixinta inta ay le'eg tahay muddada aad jawaabta sugeyso waxaad ka helaysaa bogaggayaga muddada kiis ka baardaandegga.